



Dr. George J Barnes  
Superintendent

Dr. Michael Halpert  
Chief Academic Officer

### Governing Board

Col Vic Grace  
President  
Member since 2022,  
past member 2010-2018

Sidra Zaidi  
Vice President  
Member since 2024

Todd Schwarz  
Member since 2010

Dr. Gail Q. Knight  
Member since 2012

Jacob George  
Member since 2024

Balsz Schools  
Tillman Middle  
Grades 6 – 8  
4309 E. Belleview Street  
(602) 629-6500

Brunson-Lee Elementary  
Grades K – 5  
1350 N. 48<sup>th</sup> Street  
(602) 629-6900

Crockett Elementary  
Grades K – 5  
501 N. 36<sup>th</sup> Street  
(602) 629-6600

Griffith Elementary  
Grades K – 5  
4505 E. Palm Lane  
(602) 629-6700

Orangedale Early Learning  
Center  
Preschool  
5048 E. Oak Street  
(602) 629-6800

Balsz Online Academy  
Grades K-8  
[balsz.org/balszonlineacademy](https://balsz.org/balszonlineacademy)

District Office  
4825 E. Roosevelt Street  
(602) 629-6400

### **Ku socota Shaqaalaha Balsz, Qoysaska, iyo Xubnaha Bulshada:**

Waxaan idiin soo qoraynaa si aan ula wadaagno warbixin muhiim ah oo ku saabsan hannaanka dhimista miisaaniyadda ee degmada iyo tallaabooyinka xiga ee la qorsheynayo.

Sidii hore loo wadaagay, hoos u dhaca tirada ardayda awgeed, Degmada Dugsiyada Hoose ee Balsz waa inay dhimto miisaaniyaddeeda wax ka badan \$3 milyan. Xaaladdan ayaa ku qasabtay Guddiga Maamulka iyo hoggaanka degmada inay si taxaddar leh u eegaan fursado kala duwan, iyaga oo mudnaanta siinaya ardayda, shaqaalaha, iyo xasilloonida mustaqbalka fog ee dugsiyada.

Toddobaadyadii la soo dhaafay, degmada waxay sii waday la shaqeynta Ururka Guddiyada Dugsiyada Arizona (ASBA) oo kaalin latalin ah ka qaadanaya taageeridda degmada iyo Guddiga Maamulka inta lagu jiro hannaanka dhimista miisaaniyadda. ASBA iyo hoggaamiyeyaasha degmada ayaa wadajir ula falgalay shaqaalaha, qoysaska, iyo xubnaha bulshada iyagoo adeegsanaya sahanno, kulammo, iyo wadhadallo si ay si fiican u fahmaan welwelka, su'aalaha, iyo mudnaanta bulshada. Waxaan u mahadcelineynaa dhammaan dadka waqtigooda u huray ka-qaybgalka iyo wadaagga aragtidooda.

### **Waxa aan ka maqalnay bulshada**

Iyadoo loo marayo sahanno iyo kulammo bulsho, qoysaska iyo shaqaaluhu waxay wadaageen mowduucyo isku mid ah. Dad badan ayaa carrabka ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay in la ilaaliyo adeegyada taageerada ardayda, in la yareeyo carqaladaha ku yimaada ardayda iyo qoysaska, iyo in la helo isgaarsiin cad oo waqtigeeda ku habboon inta hannaanku socdo. Qoysasku sidoo kale waxay muujiyeen baahida loo qabo wacyigelin dhaqan ahaan u nugul iyo fursado ay ku sii wadan karaan ka-qaybgalka ka hor inta aan go'aanno la gaarin. Jawaab-celintan ayaa weli hagaysa doodaha Guddiga Maamulka.

Intaa waxaa dheer, qoysasku waxay muujiyeen welwel ku saabsan suurtagalnimada dhimista adeegyada taageerada ardayda, iyaga oo adkeeyay muhiimadda ay leedahay ilaalinta kheyraadka ka caawiya ardayda inay dareemaan ammaan, taageero, iyo guul. Degmadu way u mahadcelineysaa jawaab-celintan, taas oo gacan ka geysatay doodaha iyo tixgelinta socda.

### **La falgalka bulshada waalidiinta Soomaaliyeed**

Iyadoo qayb ka ah dadaalkan, ASBA iyo hoggaamiyeyaasha degmada ayaa la kulmay xubno ka tirsan bulshada waalidiinta Soomaaliyeed si ay u dhageystaan uguna fahmaan aragtidooda ku saabsan hannaanka dhimista miisaaniyadda. Qoysasku waxay muujiyeen mahadnaq ay u hayaan taageerada iyo kheyraadka waxbarasho ee degmada, waxayna muujiyeen go'aan adag oo ah inay carruurtooda ku sii hayaan dugsiyada Balsz ilaa ay ka qalin-jabiyaan.

Waalidiintu waxay carrabka ku adkeeyeen muhiimadda daahfurnaanta iyo isgaarsiin cad, iyaga oo xusay in warar khaldan si fudud u faafi karaan oo saameyn ku yeelan kara go'aannada diiwaangelinta. Waxay sidoo kale muujiyeen doorbidid ay u qabaan habab isgaarsiin oo toos ah oo shakhsiyeed, sida kulammo fool-ka-fool ah, wicitaanno taleefan,



iyo fariimo cod ah oo ku baxa af-Soomaali, waxayna xuseen muhiimadda ay leedahay la shaqeynta xiriiriyayaal lagu kalsoon yahay oo dhaqan ahaan u nugul.

Waqtigan xaadirka ah, wax go'aan kama dambeys ah lama gaarin. Guddiga Maamulka ma dooran wax ikhtiyaar ah mana u janjeero qorshe gaar ah.

### **Ikhtiyaarrada dhimista miisaaniyadda**

Ikhtiyaarrada hadda la tixgelinayo waxaa ka mid ah:

- **Xiritaanka ama dib-u-habeynta dugsi**, taas oo ku lug yeelan karta in ardayda lagu mideeyo dugsi kale oo Balsz ah, in wax laga beddelo xuduudaha dugsiyada iyo waddooyinka gaadiidka, iyo in dhisme loo adeegsado ujeeddo waxbarasho ama bulsho oo kale; ama
- **Isbeddello ku yimaada shaqaalaha iyo barnaamijyada**, kuwaas oo ay ka mid noqon karaan dhimista jagooyinka si ay ula jaanqaadaan tirada ardayda, xaddididda barnaamijyo ama adeegyo gaar ah, ama hakinta kordhinta mushaharka sanadlaha ah.

Ikhtiyaar kasta wuxuu leeyahay saameyn iyo caqabado u gaar ah. Tallaabo kasta oo la qaado waxay raaci doontaa dhammaan sharciyada, heshiisyada, iyo siyaasadaha degmada ee khuseeya, waxaana la ogeysiin doonaa qoysaska haddii adeegyada ardayda ay saameyn yeeshaan.

### **Sida Guddiga Maamulka u gaari doono go'aanka**

Marka la gaarayo go'aanka, Guddiga Maamulka wuxuu tixgelin doonaa saameynta ku yeelanaysa ardayda, joogteynta maaliyadeed, jawaab-celinta shaqaalaha iyo bulshada, arrimaha gaadiidka iyo xuduudaha dugsiyada, iyo xasilloonida muddada-dheer ee degmada.

### **Tallaabooyinka xiga**

Guddiga Maamulka wuxuu kulmi doonaa **Talaadada, Janaayo 20, saacaddu markay tahay 6:30 fiidnimo**. Kulankan gudaheeda:

- Waxaa la soo bandhigi doonaa natiijooyinka ugu dambeeyay ee sahannada laga qaaday shaqaalaha iyo bulshada.
- Xubnaha Guddiga Maamulka waxay dib u eegi doonaan jawaab-celinta la ururiyey ilaa hadda waxayna ka wada hadli doonaan ikhtiyaarrada la heli karo.
- Guddiga Maamulka waxaa la filayaa inuu tallaabo qaado oo go'aan ka gaaro ikhtiyaar dhimista miisaaniyadda.

Qoysaska iyo xubnaha bulshada waa lagu soo dhaweynayaa inay kulanka ka soo qaybgalaan si toos ah. Fadlan ka hubi bogga internetka ee degmada goobta saxda ah ee kulanka. ([balsz.org/agenda](http://balsz.org/agenda))

Kadib kulanka Janaayo 20, degmada waxay bixin doontaa soo koobid ku saabsan go'aanka Guddiga Maamulka iyo tallaabooyinka xiga ee loo qaadi doono shaqaalaha iyo qoysaska.

Waxaan ognahay in wada-hadalladani ay yihiin kuwo adag oo shakhsi ah, waxaana fahamsanahay hubanti la'aanta ay abuuri karaan. Ballanqaadkeenna waa inaan sii wadno dhageysiga, isgaarsiinta cad, iyo taageeridda ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha inta hannaankani socdo.

Waad ku mahadsan tihiin ka-qaybqaadashadiinna joogtada ah iyo wada-shaqeyntiinna marka aan si wadajir ah uga gudbayno xilligan adag ee degmada.

**Si xushmad leh,**

**Guddiga Maamulka ee Degmada Dugsiyada Hoose ee Balsz  
Kooxda Hoggaanka Degmada**